



# Warbixinada Cusube ee COVID-19 ee Magaalada Burlington

Xarunta Kheyraadka iyo Soo-kabashada  
COVID-19 ee Burlington (RRC)

Meey 2021

Soomaali

## Tilmaamo:

- Qorshaha Horu-Socodka Vermont - Tilmaamaha Dib u Furitaanka
- Xaaladda Kiisaska COVID-19
- Tilmaamaha la cusbooneysiiday ee ku Aadan Xirashada Maaskarada
- Hindisaha Waxbarashada Hore - Barnaamijka Deeqda Waxbarasho ee loogu talagalay Daryeelka Carruurta
- VERAP - Barnaamijka Kaalmada Degdega ah ee Kirada Vermont
- Moving On, Moving Up (Barnaamijka Hore U Socodka, Kor Uqaadista) - Waa barnaamijka tababarka shaqada ee uu bixiyo Kalkaaliye Caafimaad oo Shatiyeysan (LNA)

# Qorshaha Horu-Socodka Vermont



Qorshaha Horu-Socodka Vermont “Vermont Forward Plan”, ayaa dhawaan la shaaciyey kaas oo dhaqangeli doona bilaha soo socda. Hadafku waa in dib loo furo dhammaan howlaha ugu bambayn 4<sup>ta</sup> Luulyo. Qorshahani wuxuu bixinayaa hagaha dib u furitaanka xarumaha si looga caawiyo dadka degan Vermont iyo ganacsiyada deegaanka inay arkaan wadada mustaqbalka ee loogu soo laabanayo safarada, howlaha ganacsiga, iyo isku imaatinnada munaasabadaha oo xaddidaad lahayn. Qorshaha waxaa soo diyaariyay Waaxda Caafimaadka, Waaxda Badbaadada Dadweynaha, iyo Hay'adda Ganacsiga iyo Horumarinta Bulshada, wuxuuna qorshaha isticmaalayaa xogta tallaalka si loo xaqiijiyo in gobolka si amaan ah dib loogu furo.

## Warbixinada cusub ee muhiimka ah waxaa ka mid ah:

**Bisha Meey 14 - Waxa Ka Cusub Isku Imaatinada** - Haddii munaasabad aysan laheyn qaab lagu ogaado haddii shaqsi la tallaalay iyo haddii kale, waxaad u qaadataa in dhammaantood ka soo qeybgalayaasha ay yihiin kuwo aan laga tallaalin waxaadna ilaalisaa xaddidaadda tirada ka soo qeybgalayaasha. Munaasabadaha iyo isu imaatinnada waa inay raacaan [Tilmaamaha Caalamiga ah](#) (Ingiriis ku qoran), oo ay ku jiraan kala fogaanshaha jireed iyo shuruudaha xirashada maaskarada.

- **Xaddidaadda Isku Imaatinada Lagu Qabto Meelaha Gudaha ah:** Hal qof oo aan la tallaalin 50kii fiit oo laba jibaaran oo ay iskugu imaan karaa illaa 300 qof oo aan la tallaalin (hadba kii yar), oo lagu daray wixii tiro dad ah oo la tallaalay hadba sida ay Tilmaamaha Caalamiga ah oggolaadaan.
- **Xaddidaadda Isku Imaatinada Lagu Qabto Meelaha Bannaanka ah:** Ilaa 900 qof oo aan la talaalin, oo lagu darey wixii tiro dad oo la talaalay hadba sida ay Tilmaamaha Caalamiga ah oggolaadaan.

**Xayiraadaha Safarka Waa Laqaaday** - karantiilin iyo baaritaan loogama baahna safarka marka lagu soo laabanayo Vermont. Si kastaba ha noqotee, xayiraadaha qaar ee karantiilinta iyo baaritaanka ayaa wali lagu dabaqi karaa safarka caalamiga ah. Tilmaamuhu u degsan way ku kala duwanaan karaan gobolada, sidaa darteed kahor intaadan qorsheysan safarka, iska hubi tilmaamaha safarka ee meesha aad u socoto.


## Luulyo 4 - Qaadista Dhammaan Xayiraadaha

- Kulammada iyo munaasabadaha - ma jiraan xaddidaadyo ku aadan tirada dadka, munaasabadaha lagu qabto bannaanka ayaa lagu dhiirrigelinayaa
- Shuruudaha xirashada maaskarada iyo kala fogaanshaha jirka - khasab ma aha laakiin aad ayaa loogu dhiirrigelinayaa

- Hawlgallada Ganacsiga - [Tilmaamaha Caalamiga ah](#) (Ingiriis ku qoran) ayaa lagu dhiirrigelinayaa dhammaan qaybaha ganacsiga

## Xaaladda Kiisaska COVID-19

### New Cases by County



Magaaladu waxay sii wadaysaa inay kormeerto jiritaanka COVID-19 ee bulshadeeda dhexdeeda ah. **Wararkii ugu dambeeyay waxay muujinayaan in kiisaska ay ka yeraanayaan aaggeenna, tan iyo dhammaadkii Abriil.**

- Celcelis ahaan toddobo maalmood (markay ahayd dhammaadkii Abriil) - 21.6 kiisas ayaa la soo sheegay
- Da'da kooxaha ugu badan ee laga helo cudurka COVID-19 (4-tii toddobaad ee la soo dhaafay) - waa da'da 20-29
- Xogta hadda la hayo waxay muujineysaa in ka badan **61% xubnaha bulshada Vermont inay heleen ugu yaraan hal qiyaas oo tallaah ah.**
- Kiisaska COVID-19 ee laxiriira xubnaha waayeelka ah ee bulshada ayaa hoos usii dhacaya maadaama in badan ay ka faa'iideysanayaan tallaalada. **Inkasta oo tirooyinkani ay muujinayaan horumar wanaagsan, haddana waxaan weli u baahan nahay inaan sii wadno inaan taxadarno xilligan.**

**Waxa aad sameyn karto:** Fadlan sii wad xirashada maaskaro, raac tilmaamaha Gobolka ee ku saabsan la kulanka dadka ka baxsan reerkaaga, oo tixgeli baaritaanka bilaashka ah (kaas oo ah mid fudud oo suuf sanka la geliyo, maahan baaritaankii hore ee sanka meel dheer laga gelin jirey) laga heli karo 405 Pine Street ee Burlington maalin kasta inta udhaxeysa 10:00 am-6:00 pm. Qaadashada tallaalka ayaa sidoo kale si weyn u yareyn kara faafitaanka fayraska ee bulshada dhexdeeda.

# Hindisaha Waxbarashada Hore



Ma ubaahantahay caawimaadda bixinta lacagaha daryeelka carruurta? Ilmahaagu waxaa laga yaabaa inuu u qalmo Barnaamijka Deeqda-waxbarasho ee Tallaabooyinka Koowaad (First Steps Scholarship Program)

Qoysaska u qalma waxay ***Deeqda Waxbarasho ee Tallaabooyinka Koowaad*** ka heli karaan Magaalada Burlington, si looga caawiyo kharashka waxbarashada ee daryeelka caruurta waqtiga buuxa ah kuwaas oo ku jira barnaamijyada aqoonta ah! Si ay u codsadaan, qoysasku waxay u baahan yihiin inay ahaadaan kuwo degan Burlington, oo waa inay buuxiyaan shuruudaha dakhliga ee hoos ku xusan, oo waa inay haystaan ilmo da'diisu tahay 8 toddobaad jir illaa 2 ½ sano jir. Isticmaal linkigaan si aad u hesho wixii faahfaahin dheeri ah!

Dakhliga qoyska soo gala waa inuu ahaadaa ama ka hooseeya 80% ee Dakhliga Dhexe ee Aagga (AMI).

Tirada Xubnaha Qoyska	2 qofood	3 qofood	4 qofood	5 qofood	6 qofood	7 qofood	8 qofood
Dakhliga Sanadlaha ah waa inuu ahaadaa ama ka hooseeyaa	\$61,400	69,050	\$76,700	\$82,850	\$89,900	\$95,150	\$101,250

## SIDA LOO CODSADO:

Waxaa la aqbalayaa codsiyada muddada codsiga deeqda waxbarasho ee 2020-2021. Si aad u codsato, wac ama iimayl u dir Paula Bonnie paula@letsgrowkids.org ama 802-398-5464. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa Xarunta Wicitaanka ee RRC oo laga helo 802-755-7239 si aad u hesho wixii caawimaad ah. Adeegyada turjubaada taleefanka ayaa la heli karaa.

Wax dheeri ah ka ogow [www.burlingtonvt.gov/it/earlylearning](http://www.burlingtonvt.gov/it/earlylearning).

# Barnaamijka Kaalmada Degdega ah ee Kirada Vermont



Barnaamijka Kaalmada Degdega ah ee Kirada Vermont waxaa loo sameeyay in lagu caawiyo kireystayaasha la tacaalaya caqabadaha dhaqaale ee la xiriira Cudurka faafa ee COVID-19. Qoysaska uqalma, barnaamijku wuxuu siiyaa kiro iyo gargaar tashiilad si looga caawiyo dadka reer Vermont inay ka fogaadaan qixitaanka ama luminta adeegyada guriga.

Barnaamijku wuxuu qoysaska ka caawiyaa bixinta haraaga kirooyinka hadda ah iyo kuwii hore, kharashaadka tamarta guriga iyo adeegyada guriga ee hadda ah iyo kuwii hore, iyo kharashyada kale ee la xiriira guryaha. Kaalmada adeegyada guriga waxaa ka mid noqon kara kharashyada korantada, gaaska, biyaha, bulaacada, qaadista qashinka iyo tamarta, sida shidaalka. Codsiyada waxaa loo baahan doonaa inay soo buuxiyaan kireystaha iyo milkiilaha guriga labadaba, oo lacag bixin waxaa si toos ah loogu dirayaa milkiilaha.

Websaydhka: <https://erap.vsha.org/> (Ingiriis ku qoran)

Wixii Caawimaad ah ee La Xiriira Codsiga iyo Taageerada Luqadda, la xiriir:

AALV - Ururka Afrikaanka ku nool Vermont

<http://www.aalv-vt.org/>  
(802) 985-3106

CVOEO - Awood Siinta Dhaqaale ee Mashruuca New Americans

<https://www.cvoeo.org/>  
(802) 860-1417 x117

USCRI Vermont - Guddiga Mareykanka ee Qaxootiga iyo Muhaajiriinta

<https://refugees.org/uscri-vermont/>  
(802) 655-1963

# Barnaamijka Horu-Socodka, Kor Uqaadista



## DIYAAR MA U TAHAY ISBEDEL?

**XIRFAD SHAQO OO CUSUB ka bilow qeybta daryeelka caafimaadka oo KOBAC!**

**MUSHAHAAR SAREEAYA** shaqeyso adigoo ah Kalkaaliye Caafimaad oo Ruqsad haysta (LNA). Barnaamijkan tababarka LNA wuxuu kaqeybgalayaasha siin doonaa:

- Koorso 10 usbuuc ah oo lagu bixiyo internetka iyo shaqsi ahaanba
- 32 saacadood oo tababar LACAG LAGU BIXIYO ah, ka dib marka la dhammeeyo kooxada
- U diyaargarow buuxa ee Imtixaanka LNA Laysin Siinta ee Laanqayrta Cas
- Horumarinta xirfad shaqo
- Barnaamijka Horu-Socodka, Kor Uqaadista wuxuu lashaqeynayaa UVMCC, Deegaanka Ethan Allen iyo Square Cathedral
- Waa u bilaash dhammaan codsadyaasha u qalma

## Jadwalka:

Koorsadu waa seddex habeen usbuuciiba, 6:00- 9:00 pm.

## Si Aad U Codsato:

Booqo [www.burlingtonvt.gov/covid-19/LNA](http://www.burlingtonvt.gov/covid-19/LNA)

Wixii su'aalo ah, iimayl ugu dir [CEDOLNA@burlingtonvt.gov](mailto:CEDOLNA@burlingtonvt.gov).

Codsiyada waxaa dib loogu eegi doonaa qaab joogto ah laga bilaabo 10ka Bisha Meey.

# Macluumaadka COVID-19

Waaxda Caafimaadka Vermont waxay leedahay bogag luuqad shaqsiyeed leh oo ku jira macluumaadka caafimaadka ee COVID-19:

Soomaali: <https://www.healthvermont.gov/covid-19/resources/multilingual-resources#Somali>

# Wixii su'aalo ah? Caawinaad ma u baahan tahay?

**Xarunta Kheyraadka iyo Soo-kabashada COVID-19 Burlington (RRC)** waxay halkan u joogtaa inay ku caawiso, nagala soo xiriir 802-755-7239 ama [recovery@burlingtonvt.gov](mailto:recovery@burlingtonvt.gov) oo farriin ahaan u reeb magacaaga, luqadda aad doorbidayso, iyo macluumaadka lagaala soo xiriiri karo waxaana kuu caawin doonnaa sida ugu dhakhsaha badan. Xarunteena wicitaanku waxay leedahay adeegyada tarjumaada taleefanka. Saacadaha aan shaqeyno waa Isniinta ilaa Jimcaha, 8:00 am-4:30 pm.



# Hel Tarjumaadaha:

Waaxda Caafimaadka Vermont

<https://www.healthvermont.gov/media/translation/covid-19-translations>

Magaalada Burlington

<https://www.burlingtonvt.gov/covid-19/translated>

Guddiga Iuuqadaha badan ee Vermont:

<https://www.youtube.com/channel/UC3zjPpeFnXqvESr1y3d4DvQ>

*Macluumaadka ku jira dukumintigan waa la beddeli karaa hadba inta tilmaamaha laga cusbooneysiinayo ilaa heer qaran iyo heer gobol*